

Ballan tijaabo covid-19 lagaaga qaadaayo qabso.

Waxaad adigu iska qaadi kartaa tijaabo si aad ugu eegto haddii aad hadda qabtid infegshanka/caabuqa uu keeno covid-19.

Tijaabada waxa loo yaqaanaa baaritaanka PCR-ka. Waxaanu tijaabada ka qaadnaa oo kaliya qofka qaba calaamadaha covid-19.

Waxaad toos ballan uga qabsan kartaa adigoo 1177.se ku soo galaaya bank id-ga ama Freja eID Plus. Waxay tani khuseysaa qofka 13 sanno jir buuxiyey ee calaamadaha covid-19 lahaa ugu yaraan 48 saacadood kuwaas oo ka sii darey.

Sidan ayaad ballanta tijaabada u qabsan kartaa

1. Waxaad soo galaysaa 1177.se adigoo dooranaaya adeegga elektarooniga ah "Provtagning Covid-19 (Östergötland)" ee ku hoos yaal cinwaanka Regionen rekommenderar.
2. Adiga ayaa dalbanaaya qaadista tijaabada. Waa inaad dalabka dhammaystirtid si aad talaabada xigta ugu dooran karto boos oo aad ballan uga qabsan karto mid ka mid ah qodobbada tijaabada lagu qaadaayo.
3. Adiga ayaa dooranaaya goobta tijaabada lagu qaadaayo
4. Waxaad qabsanaysaa balan. Haddii aan waqti la qabsan la haysan, ayaan wax tijaabo ah la qaadeynin.
5. Waxaad heli doontaa xaqiijin iyadoo la soo marinaayo 1177.se taas oo uu la socdo macluumaad ku saabsan waqtiga qaadista tijaabada iyo tilmaanta sida goobta lagu tagaayo.
6. Markay waqtigaagii balanta gaarto ayaad goobta tijaabada lagu qaadaayo aadi doontaa. Baaskiil soo kaxeeyso, lug ku kaalay ama soo kaxeeyso gaarigaaga ama gaadiid kale oo kaligaa aad saaran tahay. Waa inaad soo raacin gaadiidka dadweynaha ama taksi maadaama oo aad calaamado leedahay.
7. So qaado aqoonsi/ID sawir leh.
8. Goobta lagu qaadaayo tijaabada ayaad sugeysaa ilaa inta lagu yeedhaayo.
9. Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona sida tijaabada loo sameynaayo iyagoo tijaabadana kaa qaadi doona.
10. Waxaad jawaabta heli doontaa muddo 2-4 maalmood gudahood ah. Intaad sugeyso natiijada tijaabada, waa inaad guriga joogtaa maxaa yeelay waxaad leedahay calaamado. Ku sameyso ogeysiis fariin sms-ta ah ama emayl ka ah markaas ayaad ogeysiis helaysaa marka jawaabta tijaabada timaado adeega internetka ee 1177 Vårdguidens.

Sidan ayaad ballan tijaabada u qabsan kartaa xarunta caafimaadka

Haddii aadan haysan fursad aad ku aadeyso mid ka mid ah qodobbada tijaabo-qaadista ee dhexe ayaad codsi tijaabo qaadista ah u soo dirsan kartaa xarunta xaruntaada caafimaadka adigoo soo maraaya foomka dhijitaalka ah.

Haddii aanad isticmaali karin 1177.se ayaad taas badelkeeda telefoon ahaan kula soo xiriiri doontaa xaruntaada caafimaadka.

Halkan waxaad ka heleysaa foomka qaadista tijaabada ee xarunta caafimaadka

- Soo gal 1177.se.
- Qeybta "Hitta vård" hoosteeda, waxaad ka raadsan doontaa adiga xaruntaada caafimaadka ee aad ka diiwaangashan tahay
- Cinwaanka Våra e-tjänster hoostiisa ka dooro "Förfrågan om provtagning för pågående covid-19-infektion"
- Ku soo gal bank id-gaaga oo buuxi foomka